



**KUSOCOTA: QOYSASKA & BULSHADA PPS**

**KUS: NIDAAMYADA AMNIGA CUSUB EE DUGSIYADA PPS**

**Bulshada PPS ee Qaaliga ahoow,**

Badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaheena waa mudnaan. Qoysasku waa shuraako muhiim u ah taageerida dugsiyadeena. Waxaan kaaga mahadcelineynaa taageeradaada waxaan kugu soo dhoweyneynaa dugsiyadeena. Si loo hubiyo indugsiyadeena ay u yihiin meel aamin ah ardayda iyo shaqaalaheena, waxaan qaadeynaa talaabooyin dheeri ah oo aan ku xaqiijineyno inaan ogaanno qofka kujira dhismayaasheena marwalba.

**Markii ay soo galaan dugsiya PPS, booqdayaasha/mutadawiciinta waxay u baahan doonaan inay soo bandhigaan aqoonsi ay dowladdu siisay (tusaale, laysanka darawalka, Kaarka Aqoonsiga Gobolka).** Haddii aadan aqoonsi haysan, waxaa lagu weydiisan doonaa inaad bixiso magacaaga iyo taariikhda dhalashadaada. Nidaamkan cusub wuxuu u oggolaanayaa PPS inay baarto booqdayaasha iyo mutadawiciinta ka soo horjeedda diiwaanka dembiilaha galmada. Fadlan la soco in dembiilayaasha galmada ee diiwaangashan aan loo oggolaan inay galaan aagga dugsiya (Fiiri Nidaamka: [Dembiilayaasha Galmada ee Diiwaangashan 3.10.015-AD](#)). Dhammaan booqdayaasha/mutadhawiciinta waxay u baahan doonaan inay xidhaan calaamad daabacan oo tilmaamaysa magacooda, sawirkooda, taariikhda iyo halka ay u socdaan.

Marka ugu horeysa mutadhawiciinta waa inay soo booqdaan [www.pps.net/volunteer](http://www.pps.net/volunteer) si loo buuxiyo arjiga tabarucaada ee onlynka ah lagana gudbo Hubinta Taariikhda Tabaruca. Mutadawiciinta la ogolaaday ayaa lagu dari doonaa nidaamka waxayna u baahan doonaan inay keenaan aqoonsi markii ugu horeysay booqashadooda. Tabarucayaal la oggolaaday ayaa laga yaabaa inay kormeeraan oo ay la shaqeeyaan ardayda dhigata dugsiyadeena, halka booqdayaasha loo oggol yahay marin u xadidan iyo muddo gaaban.

Waad ku mahadsantahay, fahamkaaga iyo taageeradaada borotokoolka badbaadada dugsiya ee degmaadeena.

